# Soomaaliya

Dadka Soomaaliyeed waxaa ay weli la rafaadsan yihiin mid ka mid ah masiibooyinka ugu ba'an ee bani'aadannimo ee dunida ka dhaca. Waxaa burburey rajo nabadeed oo la qabay kadib soo dhisiddii horraanta sanadka 2009 ee xukuumada cusub ee Federaalka KMG ah ee uu hoggaaminayo Sh. Shariif Sh. Axmed. Magaalada Caasimada ah ee Muqdisho waxaa baabi'iyey dagaallo aan loo aabo-yeelayn oo dhinacyada oo dhami ay ku lug yeesheen dembiyo dagaal ama xadgudubyo waaweyn oo kale oo ka dhan ah xuquuqda aadanaha. Inta badan dalka intiisa kale waxa uu haatan hoos tagaa maamullo deegaanka ah oo ku xiran kooxaha mucaaradka ah ee hubaysan. In badan oo deegaannadaas ka mid ah shacabku waxay ka sheeganayaan caburin ka dhalatey diinta oo si qallafsan loo dabaqo iyo dadka rayidka ah oo ay ku jiraan carruurta oo si qasab ah loogu qoro malliishiyo ahaan si ay u dagaallamaan.

Qalalaase bani'aadanimo oo baaxad weyn ayaa madaxa lasoo kacaya, waxaana sii xumaynaya sannado badan oo abaar iyo amni darro ah oo aalaaba xannibta habsami u gaarsiinta gargaarka. Tiro gaaaysa 3.75 Malyuun oo qof—oo qiyaastii ah kala bar intii hartey dadka Soomaaliyeed—ayaa u baahan gargaar bani'aadannimo oo deg-deg ah. In ka badan 1 malyuun oo qof ayaa ka bara kacay guryahooda Soomaaliya gudaheeda halka tobannaan kunna ay dalka ka carareen iyagoo qaxooti ah sannadkii 2009-ka.

## Dagaal aan Loo Meel Dayin oo ka Dhacay Muqdisho

Sannadkii 2009-ka waxa Muqdisho ka sii socdey dagaallo burburiyey oo aan cidna loo aabo-yeeleyn. Shacabka Muqdisho ee gabaabsiga ku sii ah waxa ay weli ku samrayaan inay dushooda ku dhacaan baaxadda dagaallada u dhexeeya kooxaha hubaysan ee mucaaradka ah iyo TFG-da iyo ciidamada Midowga Afrika ee AMISOM. Ciidamadii Itoobiyaanka ahaa waxa ay ka baxeen Soomaaliya dabayaaqadii sanadii 2008-da, taasi oo horseedey inay kumannaan qof ay ku soo laabtaan caasimadda iyagoo nabad ka rajo qaba. Laakiin badankood ayaa lagu qasbey inay hadana mar kale cararaan markii uu dib u billowdey dagaalkii oo sidii horeyba u dhici jirtay lagu hoobtay.

Dhinacyada isku haya dagaalka Muqdisho waxay dhammaantood ku lug yeesheen dembiyo dagaal sannadkii 2009-ka. TFG-da iyo xoogagga mucaaradku waxay labaduba ciidan ahaan u qorteeen carruurta si ay uga mid noqdaan xoogaggooda diriraya, inkastoo falkani aad ugu

baahsan yahay la iskuna qasbo goobaha ay ka taliyaan kooxaha mucaaradka. Xoogagga mucaaradka sida al-Shabaab iyo Xisbul Islam waxa ay si joogto ah duqeymo hoobiyeyaal ah oo aan bartilmaameed haysan la beegsanayeen goobaha ay gacanta ku hayaan TFG-da iyo AMISOM. In rayidka loo isticmaalo gabbaad ahaan marka la qaadayo weerarrada aan loo meeldayin, Weliba iyagoo sida muuqata uga dan leh inay soo jiidaan aargudasho weerarradooda looga soo jawaabo oo ay tiro kale oo rayid ahi ku naf waayaan, waxay noqotey xeelado ay si joogto ah u adeegsadaan mucaaradku. Hoggaamiyaha Xisbul Islam Sheekh Xasan Dahir Aweys waxa uu si aan qarsoodi lahayn u sheegtey inay rayidka u isticmaalaan gabbaad ahaan.

Dhinaca kalena, sannadkii 2009-ka oodhan awoodda TFG-da ee inay hawlgeliso ciidammo ka dagaallama Muqdisho waxay ahayd mid aad u liidata. Waxayna ku tiirsanayd saraakiishii lagu yiqiinney inay gaystaan xadgudubyada sida taliyaha ciidanka boliiska Cabdi Qaybdiid oo ciidankiisu ay sannadkii 2008-da mas'uul ka ahaayeen xadgudubyo waaweyn oo ka dhan ah xuquuqda aadanaha.

TFG-du waxay sida qaalibka ah ku tiirsan tahay 5000 oo ah ciidamada AMISOM kuwaasi oo ilaaliya jiritaankeeda . Ciidanka AMISOM waxa lagu soo qaadey weerarro is daba joog ah oo ay ku jireen weerarro culus oo is-qarxin ah, waxayna mararka qaarkood kaga jawaabaan inay hoobiyayaal si aan loo meel dayin ugu garaacaan deegaannada mucaaradku gacanta ku hayaan, sida deegaannada u dhow dhow suuqa Bakaaraha. Bishii Febraayo 2009-ka, Ciidanka AMISOM waxaa lagu eedeeyey in mar lagu soo weerarey Muqdisho ay rasaas oodda kaga qaadeen si aan kala sooc lahayn dadweyne badan. AMISOM waxaa ay furtey baaritaan la xiriirta dhacdadan—waana markii ugu horreysey sida muuqata ee ay tallaabadan qaado—laakiin warbixin kama damabays ah lagama soo saarin.

### Xadgudubyo Ka jira Deegaannada Mucaaradku xukumaan

Deegaannada Koonfurta iyo Badhtamaha Soomaaliya waxay sannadii 2009-ka oo dhan intooda badani gacanta ugu jireen maamul hoosaadyo ku xiran al-Shabaab ama kooxaha kale ee mucaaradka. Deganaansho iyo xasillooni illaa xad ah ayaa ka jirtey meelo ka mid ah deegaannada ay mucaaradku gacanta ku hayaan, laakiin in badan oo maamulladooda ka mid ahi xadgudubyo waaweyn ayey kula kaceen dadweynihii ay xukumayeen.

Al-Shabaab si gaar ahaaneed waxay ku caan baxeen xadgudubyo joogto ah iyo si aan sharciyeysnayn oo loo dabaqo xukunka Shareecada, taasoo ay ka dhasheen in ugu yaraan dhowr jeer dembiyo la sheegey in la gaystey lagu fuliyey ciqaabo ah addimo goyn, madaxyo-goyn, iyo, in bishii Oktoobar 2008-dii magaalada Kismaayo dhagax lagu diley gabadh da'yar oo lagu eedeeyey inay dhilleysatey. Dadka ku nool magaalada koonfureed ee Ceelwaaq

waxay hay'adda Human Rights Watch u sheegeen in horraantii sannadka 2009-ka ay maliishiyada al-Shabaab ee deegaanku ku qasbeen dumarka inay joojiyaan shaqada shaah-iibinta, iyagoo sidoo kalena garaacey haween si qarsoodi ah u iibinayey qaadka oo ay al-Shabaab doonayeen inay mamnuucaan.

Deegaannada qaar al-Shabaab iyo kooxaha kale ee Mucaaradku waxay si qasab ah ragga iyo wiilasha ugu qorayeen si ay uga mid noqdaan maliishiyaadkooda. Magaalada Jowhar, tusaale ahaan, maliishiyada al-Shabaab ayaa lagu soo warramay sannadkii 2009-ka inay ragga qafaalayeen si ay u noqdaan ciidammo milateri. Maliishiyaadka mucaaradka ah badidood waxaa ciidamadooda qayb ka ah carruurta; Ugu yaraan dhowr meelood oo Soomaaliya ka mid ah, al-Shabaab si bareer ah ayey u beegsanayeen carruurta inay ciidan ahaan u qortaan iyagoo adeegsanaya xeelado isugu jira ballanqaadyo, hanjabaado iyo caqli-geddin.

### Weerarrada Lagu hayo Suxufiyiinta, Difaacayaasha Xuquuqda Aadanaha iyo Shaqaalaha Gargaarka

Soomaaliya oo mar lahayd saxaafad firfircoon oo madaxbannaan iyo ururrada buslahada rayidka ah waxaa burburiyey dagaallo lagu qaadey iyo hanjabaadyo saddexdii sano ee laga soo gudbey. Ugu yaraan lix suxufi ayaa lagu soo warramay in la diley sanadkii 2009-ka, qaarkood waxaa lagu diley si qorsheysan oo khaarijin ah qaarna waxaa diley rasaasta wiiftada ah oo maratey nolosha dad badan oo rayid ah. TFG-da iyo xoogaga mucaaradku waxaa ay si isku mid ah ugu lug yeesheen hanjabaado lala beegsanayey suxufiyiinta faafiya wararka aysan jecleysan.

Weerarrada lagu bartilmaameedsanayey difaacayaasha xuquuqda aadanuhu waxa ay ahaayeen sannadkii 2009-ka kuwo aad uga hooseeya kuwii sannadkii 2008-da. Laakiin qayb ahaan tani waxay muujinaysaa in xaqiiqadu tahay iyadoo in badan oo ka mid ah shaqsiyaadkii ugu caansanaa difaacayaasha xuquuqda aadanaha ay dalka isaga baxsadeen. Intii ku harteyna waxay la kulmeen awoodoodii inay si wax ku ool ah ugu hawlgalaan ay si lama filaan ah u daciiftey nabadgelyo darrida jirta iyo si gaar ahaaneed oo loogu hanjabey darted.

Gaarsiinta kaalmada gargaarka bani'aadanimo ee Soomaaliya waxaa si aad ah u wiiqey nabadgelyo xumada dalka ka jirta iyo hanjabaadaha sida gaar ahaaneed loola beegsanayo hay'adaha gargaarka. Hay'adaha gargaarka ee ka shaqaynaya Soomaaliya waxaa intooda badan qasab ku noqotey inay si aad ah u dhimaan hawlahoodii ama gebi ahaanba waa laga saarey koonfurta iyo badhtamaha  Soomaaliya. Deegaannada ay maamulaan mucaaradka oo ay malaayiin Soomaali ahi u baahan yihiin gargaar bani'aadannimo, waxaa ay hay'adaha

gargaarku hanjabaado joogto ah kala kulmayeen al-Shabaab iyo kooxaha kale oo ku eedeynaya inay qayb ka yihiin dadaalka beesha caalamku ay ku taageereyso dagaallada ay ku jirto TFG-du. Bishii Oktoobar 2009-ka warqado lagu daadiyey Muqdisho ayaa lagu eedeeyey isbitaallada inay la shaqeeyaan TFG-da waxaana loogu hanjabay in dagaal lala geli doono.

## Dimoqraadiyadda oo Khatar ku Jirta Somaliland

Jamhuuriyada goonida isu taagtey ee Somaliland waxay ku tillaabsatey illaa xad nabadgelyo iyo xasillooni aad u sarreysa tan iyo sannadkii 1991-kii. Iyadoo weliba madaxbannaanideeda uusan jirin dal aqoonsan dunida oo dhan, hadana Somaliland waxay aasaaska u dhigtey hay'ado ku dhisan maamul dimoqraadi ah, waxayna dadkeeda ka badbaadisey xadgudubyada joogtada noqdey ee saameyeeyey dadka Soomaaliyeed ee Koonfurta ku nool. Laakiin horumarkii ay Somaliland ku tilaabsatey ee dhinacyada dawladnimada iyo xuquuqda aadanaha haatan halis ayey ku jiraan, waxaana loo aanaynayaa inay ugu wacan tahay dib u dhigis is xig-xigtey ee doorashoyinkii la sugayey ee madaxtinnimada oo hore loogu qorsheeyey inay dhacaan Abriil 2008. Doorashooyinkaasi waxay ahayd inay sii dhidbaan horumarkaas dhinaca dimoqraadiyadda; haatanse dib u dhigista doorashooyinku waxay su'aal gelinaysaa sida ay dawladda Somaliland dhab uga tahay dimoqraadiyadu waxayna khatar gelin kartaa xasiloonida deegaankooda. Dawladda Somaliland waxay sidoo kale ku guul-darresatey inay waxka qabato guud ahaan dhibaatooyin kala duwan oo la xiriira xuquuqda aadanaha sida xukuumadda oo adeegsata guddiyo amni oo aan sharci ahayn si ay xabsiga u dhigaan dadka, oo ay ku jiraan carruur, kuwaasoo loo haysto dembiyo kala gedisan iyadoon wax maxkamad ah la horgeyn.

## Xubnaha Muhiimka ah ee Beesha Caalamka

Waxaa badanaa dhacday in ku lug-lahaanshaha arrimaha Soomaaliya ee dhowr xubnood oo ka tirsan beesha caalamka ay noqotey mid wax duminaysa. Siyaasada dawladaha Galbeedka iyo Midowga Afrikaba waxay ahayd in taageero buuxda lala garab istaago dawladda hareereysan ee Federaalka KMG ah ee Soomaliya. Iyadoo taas la fulinayo ayuuna Midowga Afrika geeyey ciidamada AMISOM oo gaaraya 5,000 oo ciidamada Yugaandha iyo Burundi ah si ay u ilaaliyaan xarumaha muhiimka ah ee dawladda iyo saraakiisha xukuumadda oo ku sugan Koonfurta Muqdisho, waxaana taageeray Golaha Ammaanka ee QM. Sanadkii 2009-ka deeq bixiyayaashu waxay ku yabooheen in ka badan 200 Malyuun oo Dollarka Mareykanka ah oo inteeda badani ahayd taageero dhinaca amniga ah oo loo fidinayey AMISOM iyo TFG-da; illaa hadana in ka yar 3 dhig hal meel oo kaalmadaas ah ayaa la bixiyey. Dawladda Mareykanku waxay gooni ahaan TFG-da gaarsiisey lacag iyo hub—ay ku jiraan hoobiyayaal, hub aysan cidina iskudayin inay u adeegsato si waafaqsan xeerarka dagaalka. Hubka ay TFG-du heshey badankiis waxaa uu gaarey suuqyada wax lagu kala gato.

Taageerada xoogga leh ee beesha caalamku siinayso TFG-da waxaa ay sida qaalibka ah salka ku haysaa walaaca ah in qaar ka tirsan hoggaamiyayaasha al-Shabaab ay xiriir la leeyihiin Al-Qaacida. Dhowr boqol oo dagaalyahanno ajnabi ah oo ay qaarkood yihiin Soomaali haysata baasaboorro shisheeye, ayaa lagu qiyaasayaa inay Soomaaliya joogaan oo ay la dagaallamayaan AMISOM iyo TFG-da iyagoo garabsiinaya al-Shabaab iyo kooxaha kale. Ugu yaraan hal qarax ama sida loo malaynayo laba qarax oo is miidaamin ah ayey Soomaali ka timid Mareykanku ka fuliyeen Soomaaliya tan iyo dabayaaqadii 2008-dii—waana markii ugu horreysey abid oo weerar caynkan ahi uu fuliyo muwaadin Mareykan ah.

Itoobiya waxay ciidamadeeda kala baxdey Soomaaliya dabayaaqadii 2008-da kadib faragelin laba sano socotey oo ay dalka ka wadey. Milateriga Itoobiya waxay weli sii wadaan inay hawlgallo ka fuliyaan gudaha Soomaaliya iyagoo ku xoojinaya danaha amnigooda, laakiin ma jirto kaalin muuqata oo ay milateri ahaan ku leeyihiin dagaalka socda. Dawladda Ereteriya waxaa ay weli Soomaaliya ka ciyaareysaa kaalin wax duminaysa, iyadoo hub iyo taageero kaleba u soo daabulaysa kooxaha hubaysan ee mucaaradka ah, ujeedada ugu weyn ee ay ka leedahayna waa inay carqaladeyso danaha Itoobiya ka leedahay Soomaaliya.

Kenya iyo Yemen waxaa uu mid kastaa martigelinayaa tiro aad u ballaaran oo qaxooti Soomaaliyeed ah. Xerada Dhadhaab ee Kenya oo qaxooti la ciir-ciiraysa waxaa xeryo loogu talogalay  90,000 oo qof, haatanse waxay hoy u tahay 300,000 oo badankoodu yihiin qaxooti Soomaaliyeed. Waan-waantii dhul la doonayey in laga dhiso xero cusub oo qaxooti oo aad loogu baahi qabo una dhow Dhadhaab ayaa sannadkii 2009-ka joogsatey kadib markii la isku mari waayey. Dawladda Yemen guud ahaan wey soo dhoweysey qaxootiga Soomaaliyeed ee ugu yaraan 100,000 gaaraya ee dalkeeda deggan.